



Fadlan samee xog-ururintan si aad gacan uga gaysato dib-u-eegidda xeerka anshaxa iyo asluubta ardayga ee degmada

Gudiga Waxbarashada Portland Public Schools waxay rabaan inay helaan ra'yigaaga ku saabsan dib-u-eegista Xeerka anshaxa iyo Asluubta Ardayda degmada. Dib-u-eegistaan ayaa loogu talagalay in lagu dhiso xeer fayocelin leh kuna dhisan sinnaan.

Fadlan samee [xog-uruurinteenaan](#) lagu qoray Ingiriisiga iyo shanta luuqadood ee aan taageerno: Isbaanish, Shiinays, Fitnaamiss, Ruushka iyo Soomaali.

Gudiga waxbarashadu wuxuu dib-u-eegayaa xeerka ([4.30.010-P](#)), kaas oo markii ugu dambeysay dib-u-eegis lagu sameeyay sanadkii 2009. Dib-u-eegis ayaa lagu soo bandhigay kulanka Guddiga 16-ka Luulyo wuxuuna u furan yahay talooyinka dadweynaha, iyadoo Golaha Xeerka ee Guddiga ay sii wadaan inay ka shaqeeyaan arrintaas. Is-beddeladaha qorsheysan ee muhiimka ah iyo cusboonaysiinta waxaa ka mid ah:

- Ku biirinta qaab edbinta ogaanshaha jiridda jahwareerka
- Diirad saaridda dhaqamada fayocelinta leh ee nidaamka qaab taageeridda dabaqeedka ah
- Ku biirinta micnayn bayaan ah
- Waafajinta xeerka aragtida degmada ee sinnaanta jinsiyadaha iyo caddaaladda bulshada

Hal isbedel ee la sameeyay kadib soo jeedin lagu soo bandhigay talooyinka dadweynaha: ku biirinta luuqad gaar ah oo ku saabsan baahiyaha ardayda ee barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah.

Kadib marka natiijooyinka xog-uruurinta la isu geeyo, talooyinka isbeddelada waxaa loo gudbin doonaa Golaha Xeerka si dib loogu eego. Golaha waxay u soo diri doonaan nuqul kama dambeys ah dhammaan Guddiga oo loogu talagalay akhriska labaad iyo codeynta kulanka mustaqbalka.